# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### Kal-fadhigii 41aad Fadhigii 2aad

**Axad, 13, October, 2019**

**Quraanka: -** Md. Xaamud Cismaan

**Gudoonka: -** Gudoomiye, Baashe Maxamed Faarax.

Ajandaha Fadhiga: - Doodda Ajandaha Kal-fadhiga 41aad

**Md. Cabdiraxmaan Yuusuf Cartan** **(2min 50sec):-** Ajandaha Waxa ka maqan oo aan soo jeedinaya in lagu daro.

**Qiimeynta Xaalada Guud ee Dalka Gudaha iyo Dibadaba** intii aynu kala maqnayn sida colaada Gobolka Sanaag oo aynu ka hadalno iyo sidoo kale siyaasada dibada oo iyana culaysiyo badan Somaliland kaga soo kordhay oo aynu u baahanahay inaynu wax ka nidhaahno.

Qunsuliyad Turki ah baa inala joogta xildhibaanada askari bay u dhiibaan arrimahaas inaynu ku baraarugsanaano weeye, Xildhibaanadu karaamo iyo calankii umaday huwan yihiin, markaa arrimahaas waa in Gudoomiye aad ka hadashaan oo wax laga qabtaa.

Dhinaca Xeerarka waxaan ku talin lahaa oo aan soo jeedinayaa **in Xeerka Doorashooyinka aynu ugu horeysiino** oo inaga Xeerkaasi ina dhaafo si aan la inoogu arag inaynu inagu haysano oo diidanahay doorashooyinka.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal** **(2min 00sec):-** Shir-gudoonka, Xildhibaanada, Kaaliyayaasha iyo Saxaafada ASC, Gudoomiye ajanduhu siduu u dhigan yahay wax dood la galiyo maaha ee siday u kala mudan yihiin in loo kala horeysiiyo ayaa haboon, wax yaabo badan baa jira oo ay tahay in ajandaha lagu soo daro sida xildhibaankii hore sheegay waa in Safaarada Turkiga ninka u jooga ay Gudidda Joogtadu u yeedho oo la dareensiiyo wuxuu halkan ku joogo.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa inaynu ku soo darno Dugsiyada gaarka loo leeyahay oo Wasiirku ka soo saaray sharci khilaafsan dastuurka iyo Xeerkii Waxbarashada ee aynu ansixinay, markaa arrintaas ha lagu soo daro oo ha laga doodo isagana mana ah in Wasiirku uu sharci iyo Xeerarka khilaafo, marka anigu intaas ayaan ku soo koobayaa. WSC.

**Md. Faarax Maxamuud Cabdule** **(1min 05sec):-** Waxaan ku soo dari lahaa anigu ajandaha:-

- Qiimeynta iyo xog-ogaal u noqoshada xaalada dalka, siiba siyaasada iyo dhaqaalaha dalka.
- U yeedhista Masuuliyiinta Qaran ee Goluhu u arko muhiim in loo yeedho

Sida kale Xeerarka sidooda ayaanu ku taageersanahay ay ajandaha ugu jiraan.

**Md. Maxamuud Dhunkaale Guuteel** **(1min 10sec):-** Waxaan ku soo dari lahaa anigu ajandaha:-

- Wax ka badalka Xeerka Isgaadhsiinta.
- In Go'aan Goluhu ka soo saaro Masuuliyiinta Xilalka hore u soo qabtay ee shirarka somaliya ka qaybgalaya.
- U yeedhista Wasiirka Arrimaha Dibada iyo Wasiirka Arrimaha Gudaha oo labadaas wasiir lagula xisaabtamo xilalka ay qaranka u hayaan.

**Md. Siciid Maxamed Cilmi** **(3min 50sec):-** Bismilaahi, Shir-gudoonka, XIldhibaanada, Xoghaymaha iyo Saxaafada intaba waan idin salaamayaa, anigu laba qodob baan ka hadlayaa.

Xeerka Doorashooyinka waxaan taageerayaa soo jeedinta Xildhibaan Cartan oo aynu Xeerkan kal-fadhigan ku dhamayno, Xeerkani wuxuu u xaniban yahay Saami qaybsiga markaa arrintaas saami qaybsiga hadii Xisbiyadii ku dhiiran waayeen waxaan soo jeedinayaa in inagu aynu go'aamino oo lixda Gobol 82 kursi si saami ah ugu qaybino.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in lagu soo daro Ajandaha Xaalada Dhaqaalaha Dalka, Xaalad adag oo dhaqaale ayuu dalku ku jiraa, xaaladaas waxaynu halkan ugu darsanaynaa in loo sameeyo Gudi aan ahayn Gudidda Dhaqaalaha oo Gudiyada laga soo dhex xulo oo arrimaha dhaqaalaha soo qiimeysa ka dibna talo soo jeedin Golaha u keenta.

Arrinta saddexadaad waa dhaqangka guud iyo anshaxa, waxyaabo dhaqan xumo iyo anshax xumo ah baa ka bilawday dalka, waxa jira in fidinta diinta kiristaanka ay ka socoto meelo magaalada ka mid ah iyo websiteska, marka arrintaas Gudoomiye Gudi gaar ah ha loo saaro oo ajandaha aynu ku soo darsano.

**Md. Cabdilaahi Xuseen Cige** **(2min 09sec):-** Shir-gudoonka, XIldhibaanada, marti-sharafta iyo Saxaafada waan idin salaamayaa, Gudoomiye aniga ra'yi ahaan waan qabaa in Ajanduhu si fiican u qoran yahay, laba qodob oo aan midna taagerayo midna soo kordhinayo ayaan ka hadlayaa.

Inagoo og xaalada guud ee dalka waxaan taageerasanahay in Qiimeynta Xaalada Dalka ajandaha lagu soo daro.

In Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Masuuliyiinta Hay'adaha Nabadgalyada Golewaynaha looga yeedho si arrimahaas xasaasiga ah wax looga waydiiyo.

Waxa kale oo aan qabaa sidii Xildhibaanadii iga horeeyay sheegeen in Safaarada Dalka Turkigu dalka ku leedaay ay waxyaabo badan oo sharafta dadka wax u dhimaya kula kacaan masuuliyiin qaran iyo haday tahay dadweynaha, marka waa in aynu u qorno Wasaarada Arrimaha Guduhu u yeedho si ay arrimaaas wax looga qabto.

**Md Cabdiqaadir Jaamac Xaamud** **(1min 00sec):-** Shir-gudoonka, XIldhibaanada, marti-sharafta iyo Saxaafada waan idin salaamayaa ASC, runtii ajanduhu wuu kooban yahay saddex qodob baan ku soo darayaa anigu.

- Xog-ogaal u noqoshada xaalada dalka iyo Maamul daadejinta dalka oo Wasaaradda Arrimaha Gudaha baa kolay looga yeedhayaa iyo Xaalada Dhaqaalaha dalka in lagu sameeyo Cilmi baadhis.
- Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Isgaadhsiinta oo aad loogu baahan yahay in wax laga badalo.

**Md. Cabdiraxmaan Muuse Jaamac** **(1min 30sec):-** Shir-gudoonka, Xildhibaanada, Xoghaymaha iyo Saxaafada waan idin salaamayaa, waxa ajandaha ka maqan.

Warbixintii Shir-gudoonka oo ka maqan, Qiimeynta iyo Xog-ogaal u noqoshada Xaalada Dalka, U Yeedhista Wasiirada Arrimaha Gudaha iyo Arrimaha Dibada iyo Xisaab Xidhka 2017 wuu inagu raagay kii kale ayaa hada soo socda marka aynu isdhaafino oo aynu ugu horeysiino.

**Md. Cumar Axmed Saleebaan** **(2min 03sec):-** Gudoomiye anigu marka hore waxaan leeyahay **Xeerka Dakhliga Shidaalka** oo ajande walba ku jira ha laga saaro meesha waayo saansaantiisba ma hayno marka aynu shidaal saansaantiisa aragno ayeynu eegi doona sidaynu u qaybsanayno.

Arrinta labaad waxa weeye waxaan ku raacsanahay Wasiirka Diinta iyo Awqaafta ha loo yeedho waayo fidinta diintaas kiristaanka waxa dheer websiteyadii oo naago qaaqaawan iyo wax is-dhunkanaya ayaa ka buuxa marka Wasiirka Diinta waa in loo yeedhaa si wax looga waydiiyo taasna waan taageeray.

Waxa kale oo aan ku darayaa wiig kasta halka Wajaale waxa lagu qabtaa gaadhi sida beer iyo kaliyo wax alaale waxay yihiin dad, daanyeer iyo xayawaan la garan waayay, marka waxaan leeyahay fayadhawrka in lagu daro ayaan soo jeedinayaa.

**Md. Bashiir Xuseen Tukaale** **(1min 02sec):-** anigu waxaan ku dari laha qodob muhiima ah oo taagan dalkana ka jira oo ah xaalada Gobolka Sanaag taas oo u baahan inaynu ka doodno, tan labaad Madaxweynuhu waa kii cafis u waayay Caare arrintaasna aynu ka doodno oo cafis u raadino.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada**
_______________________________________

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl**
_______________________________________